



Sualaha Inta Badan La Isweydiyo (FAQ-yada) ee Hagida Db u furida Gobolka oo dhan

Ciyaaraha Madadaalada, Dib ugu soo noqoshada Xadeysan ee Cayaaraha Gaarka ah *(La cusbooneysiiey markey taariikhdu ahayad 9-16-2020)*

Hoos waxaa ku qoran jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo ee ku saabsan Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) [Ciyaaraha Madadaalada Gobolka oo dhan, Hagida Dib ugu soo noqoshada Xadeysan ee Cayaaraha Gaarka ah](#). Hagidan iyo FAQ-yadan waxay ka dhaqan-gelayaan gobolka oo dhan OHA waxay bixisaa FAQ-yadan si ay uga caawiso bulshada inay fahamto hagida, si ay uga jawaabaan su'aalaha daneeyeyaasha, iyo si ay u xaqiijiyaan sida hagida u quseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. FAQ-yadaan ayaa si isdabajoog ah loo cusbooneysiyyaa. FAQ-yadaan looguma talagelin inay galaan booska hagida, laakin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kabaan, oo gacan ka geystaan buuxinta faahfaahinta hagida.

S1: Waa maxay ciyaaraha loo tixgeliyo inay yihiin “ciyaar istaabasho leh”?

J1: Ciyaarta istaabashada leh waa midda ay ka qayb-qaataysaaha cayaartu jir ahaan is taabanayaan. Tababbarka iyo Jimicsiga ayaa la oggol yahay ciyaaraha istaabashada buuxda leh. Tababbarka iyo jimicsiyada, sida culeys qaadista, tababarka orodka iyo isla ciyaarida kooxda dhexdooda ah, kuma jiri karto istaabasho buuxda nooc kasta oo ay tahayba. Waqti-xaadirkan ciyaaraha istaabashada buuxdo leh waa mamnuuc. Waxaa la cayaari karaa noocyada cayaaraha ee aan la is-taabanin ama kuwa heerka is-taabashadu hooseeyo/uu yar yahay. Liiska ciyaaraha guud ee gaarka ah ee aan jir ahaan la is-taabaneynin ama kuwo heerka istaabashadu uu yar yahay/uu hooseeyo waxaa laga heli karaa [Hagida Ciyaaraha Madadaalada Gobolka oo dhan](#) iyo aaladda loo adeegsado [Hagida Dib-u-furida](#).

S2: Haddii dhismaha leeyahay afar garoomo, miyaa tababarka ama ciyaarida la ogolyahay in lagu qabto garoon walba si hal waqti ah?

J2: Haa, laakin kaliya haddii kooxyada garoon walba joogteeyaan kala fogaanshaha jireed ee looga baahanyahay oo ay u hogaansamaan shuruudaha cadadka ugu badan. Ciyaaraha madadaalada ee lagu qabto banaanka, cadadka ugu badan ee la oggol yahay waa 250 qof.

S3: Miyay garoomaha dugsiyada iyo xarumaha loo heli karaa isticmaalka xittaa haddii dugsiyada ay xiranyihiin?

J3: Dugsiyada deegaanka iyo dugsiya degmooyinka ayaa go'aansado qaabka iyo goorta xarumaha dugsiya ay isticmaali karaan dadweynaha. Kala xiriir dugsiya degmada wixii ah warbixinta ku saabsan helitaanka xarumaha dugsiya.

S4: Kooxaha ciyaaruhu miyey u safri karaan xarumaha ugaarta/tartamada ka jira gobolka Oregon dhexdiisa ama gobolo kale?

J4: Hagida OHA ma mamnuuco safarka, si kastaba ha noqotee, safarka aan muhiimka aheyn waa in loo xadeeyaa sida waafaqsan [Amarka Fullinta Gubanatooraha 20-27](#).

S5: Cayaaraha tartamada miyaa la oggol yahay?

J5: Haa. Marxaladda Kowaad, qaban-qaabiyayaasha waxaa looga baahan yahay inay raacaan [Hagiga OHA Isku-imaanshaha](#) iyo [Hagida Ciyaaraha Madadaalada ee Gobolka oo dhan](#). Marxaladda Labaad, qaban-qaabiyayaasha waxaa looga baahan yahay inay raacaan [Hagiga OHA Isku-imaanshaha](#) iyo [Hagida Ciyaaraha Madadaalada ee Gobolka oo dhan](#). Haddii tartanka uu ka dhacayo goob ku taalo degmo kujirto Marxaladda Labaad, qabanqaabiyayaasha tartanka waxay raaci karaan xadadka tirada isu-imaanshaha ee loogu talagalay [Hawlwadeenada Goobta iyo Munaasabada lagu qabanayo goob kujirto Marxalada 2-aad](#). Qaban-qaabiyayaasha waxaa looga baahan yahay inay sameeyaan qorshe lagu xadeynayo tirada daawadayaasha (tusaale ahaan waaladiinta) kuwaasoo loo oggolaadey inay soo galaan goobta cayaarta si ay suurtagal u noqoto in qof weliba midka kale uu uga fogaado ugu yaraan masaafo dhan lix (6) fuud.

S6: Ciyaaraha qaar wxay u baahan yihiin taabasho kooban dhowr jeer inta lagu jiro ciyaarta isla mar ahaantaana suurtagal maaha in inta ciyaarta lagu jiro la kala fogaado masaafo dhan lix (6) fuud Arrimahan miyaa la oggol yahay?

J6: Haa. Taabashada yar ama mida heer-dhexaadka ah ee cayaaraha waa la oggol yahay. Horyaalada ciyaaraha, barayaasha iyo tababarayaashu waa inay qaadaan tallaabooyin lagu hubinayo in taabashada jireed ay u dhaxeeyso keliya ka-qaybgalayaasha/ciyaartoyda loo baahan yahay inay ciyaaraan.

S7: Wixii ah ciyaaraha sida softball ama beesbookka halkaasi oo balooniga la taabto dhoor jeer, intee in la eg ayay OHA ku talinaysaa in balloonta lagu ciyaariyo la jeermis-dilo?

J7: Qalabka la wadaago waa in si joogto ah loo nadiifiyaa oo loo jeermis-dilaa hadba qaabka ku habboon cayaarta (tusaale ahaan, muddada u dhaxeeyso ciyaartoyda, xiliga ay kooxaha isbeddelyaan, ama waqtiyada u dhaxeeyo ciyaaraha). Isticmaal jeermis-dilayaasha ku qoran [Liiska ay ansixisay Wakaalada Illaalada Bay'ada \(EPA\)](#) ee loogu talagalay ka hortagga fayraska SARS-CoV-2 ee keena COVID-19. Ilaa hadda ma jiraan wax badeecooyin ah oo ay ku qoran yihiin astaan muujineysa in loogu talagalay COVID-19, hase ahaatee qaar badan ayaa waxay lahaan doonaan qoraal ama warbixin laga heli karo websaydkooda oo ku

saabsan wax ku oolkooda wax kaqabashada fayraska korona ee aadanaha. Sidoo kale cayaartoyda waxaa looga baahan yahay inay si joogto ah u dhaqaan gacmahooda ama u isticmaalaan jeermis-dilaha.

S8: Miyaa cayaartoyda looga baahan yahay inay xirtaan maaskaraha, gaashaanka wajiga iyo daboolada wajiga iyo gacmo gashiyada?

J8: Cayaartoyga waxaa looga baahan yahay markay cayaarayaan cayaaraha goobaha guadaha ah inay xirtaan maaskaraha wejiga lagu xirto, gaashaanka wajiga, iyo daboolada wejiga. Cayaartoyda waxaa looga baahan yahay markay cayaarayaan cayaaraha goobaha dibadda ah inay xirtaan maaskaraha wejiga lagu xirto, gaashaanka wajiga, iyo daboolada wejiga gaar ahaan marka ayna suurtagal ahayn inay kala fogaadaan masaafu dhan lix (6) fuud, marka laga reebo haddii cayaartoyda ay cayaarayaan ciyaaro ka dhigayo xirashada maaskaraha, gaashaanka wajiga ama daboolada wajiga mid aan suurtagal ahayn, sida dabaasha. Maaskaraha, gaashaanka wajiga ama daboolada wajiga waxaa looga baahan yahay cayaartoyda iyo kuwa daawanaya cayaarta iyaga oo is dhinac taagan gaar ahaan waqtiyada ayna suurtagal ahayn inay kala fogaadaan masaafu dhan lix (6) fuud. Cayaartoyda loogama baahno inay xirtaan gacmo gashiyo.

S9: Hagrid nooc ee ah ayaa loo baahan yahay in la isticmaalo marka la ciyaarayo ciyaaraha loogu talo-galey dugsi sare?

J9: Habdhaqanka ku saabsan ciyaaraha loogu talo-galey dugsi sare, fadlan ka tixraac [Hagiga Ciyaaraha ee Dugsiga K-12](#).

S10: Miyaa la oggol yahay in la qabanqaabiyo orodka madadaalada ah sida nooca 5K iyo 10K?

J10: Haa, munaasabadahan noocyadan ah waa la oggol yahay. Qabanqaabiyeyaasha munaasabada waa inay u hogaansamaan [Hagida OHA ee Isu-imaanshaha](#) ka dhacayo degmooyinka kujira Wajiga Koowaad iyo [Hagida Dib-u-furida Wajiga Labaad ee loogu talagalay Hawlwadeenada Goobaha iyo Munaasabada lagu qabanyo degmooyin kujira Wajiga Labaad](#). Qabanqaabiyeyaasha xafladuhu waa inay sameeyaan qorshe lagu xadeynayo tirada daawadayaasha loo ogolaaday inay soo galaan goobta si markaas qof walba midka kale uga fogaado masaafu dhan lix (6) fuud.

Helitaanka dokumintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabtid, fadlan kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.